



Maayo 19, 2020

Waalidiinta/Masuuliyiinta Qaaliga ahoow,

Dawlada Ontario [ayaa ku dhawaaqday](#) maanta in dhammaan dugsiyada ay dawladu qarashkooda bixiso ee ku yaala Ontario, ayna ku jiraan dugsiyada ka tirsan Waaxda Degmo Dugsiyeedka Toronto, ay sii xirnaan doonaan inta ka hartay sanad dugsiyeedka 2019-2020 iyo in waxbarashada oonleenka ah ay sii socon doonto illaa dhammaadka Juun. Waxaan ognahay in wararka xirnaanshaha la dheerayay ay dhib ku tahay qaarkeen laakiin go'aankaan waxaa loo sameeyay ayadoo niyada lagu haayo badbaadada ardayda, shaqaalaha iyo bulshooyinka dugsiya.

Qorshe dheeraad ah oo ku aadan waxbarashada xiliga xagaaga ayay sidoo kale ku dhawaaqday dawlada. Barnaamijyada waxba xiliga xagaaga ayaa la dhigi doonaa bilaha Luuliyo iyo Agoosto waxaana lagu dari doonaa taageerooyin cusub iyo kuwo horay u jiray oo ah kuwa buundada ama aan ahayn kuwa buundada oo lasiinaayo ardayda ayna ku jiraan casharada xagaaga, kor u qaadista buundada, barnaamijyo gaar u ah ardayda nugul, ardayda waxbarashada gaarka ah ku jira ama qaba baahiyaha caafimaadka dhimirka, iyo ardayda qoomiyadaha laga tirada badan yahay. Wasaarada waxbarashada ayaa ka codsanaysa gudiyaada dugsiyada inay qorsheeyaan waxbarashada xiliga xagaaga si loogu bixiyo waxbarashada iyo waxbarista oonleenka ah, hase yeeshee waxbarista iyo waxbarashada tooska ah ayaa la samayn karaa haddii amarada xaalada degdega ah la fududeeyo ama la qaado inta lagu jiro xagaaga. Ayadoo ay jirto shaacinta maanta, TDSB waxay hadda soo gabagabayn kartaa qorshaheeda waxbarashada xagaaga waxayna shaacin doontaa qorshahaas mustaqbalka dhaw.

Dib u furida tartiibta ah ee xarumaha daryeelka caruurta ee ku yaala dugsiyada TDSB ayaa la filayaa inay bilaabato marka gobalku uu gaaro [Heerka 2](#) aad ee *Naqshadiisa Dib U furida Gobalka* waxaana lagu salayn doonaa talada ugu habboon ee saraakiisha caafimaadka bulshada waxaana ku jiri doonaa maamuusyada badqabka oo adag. Markaan ka hadalno Kaamamka Barnaamijka Xagaaga ee Maalinlaha ah ee la dheereeyay ee TDBS, Wasaarada Waxbarashada ayaa sheegtay in, ayadoo la qiyaasaayo in kobaca cabirada caafimaadka dadwaynaha ee muhiimka ah si kasoo raynayaan, in laga [yaabo](#) in kaamamka dib loo furo bilaha Luuliyo iyo Agoosto sanadkaan ayadoo la raacaayo tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka oo adag.

Waxaan ka warqabnaa in ardayda iyo qoysaska qaar ay aad u doonayaan inay qaataan alaabahooda ku haray dugsiyadeena. Fadlan ogsoonow inay socdaan qorshayaal lagu go'aaminaayo sida alaabtaan qaab ammaan ah loogu qaadan karo. Waxaan kala shaqaynaynaa Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Toronto talaabooyinka xigga waxaana idin la wadaagi doonaa qorshaha sida ugu dhakhsaha badan marka la dhamaystiro.





Waxaan doonayaa inaan markale kaaga mahadceliyo fikirka aad ku darsatay xog aruurinteenii dhawayd ee waalidka/masuulka kaasoo ku dhawaad 40,000 oo qof ay kusoo biireen wada hadal oonleen ah si ay noola wadaagaan fikradahooda. Filashooyinka ku aadan waxa waxbarashadu u ekaanayso ayaa aad u kala duwan, laakiin naqshada guud ee aan maqalnay ayaa ahayd in ardaydu xiiso u qabaan la hadalka macalimiinta iyo ardayda facood ah iyo xariirka iyo wadashaqaynta ay ka helaan. Si lamid ah fasalka caadiga ah, isdhexgalka ayaa lagu samaynayaa qaabab badan waxaana sii wadaynaa inaan kala shaqayno shaqaalaha iyo iskaashatada taageerida warbarashada ardayga, wada shaqaynta iyo faya qabka.

Ugu danbayntii, qaar badan oo idin kamid ah ayaa shaki la'aan la yaaban marka ardaydu ay kusoo laabanayaan dugsiga iyo sida xaalki noqon doono markay ku laabtaan. Dawlada ayaa sheegtay inay ku dhawaaqi doonto qorshe taariikh danbe ayadoo ka hadli doonta dib u bilaabida dugsiyada bisha Sibteembar iyo in isbadelo muhiim ah lagu samayn doono fasalada iyo jadwalka maalinlaha ah ee dugsiga si loo dhawro badqabka iyo caafimaadka qof kasta.

Daacad kuu ah,

A handwritten signature in black ink, appearing to read 'John Malloy'.

John Malloy
Agaasimaha Waxbarashada

